Dowlad-goboleedka Koofur Galbeed ee Soomaaliya
Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2018

Tilmaanta/Amarka 6aad ee Dakhliga. Maareynta Ujuurooyinka Suuqyada

1. Tilmaantan/amarkan waxaa Wasiirka Maaliyadda uu u soo saarey si waafaqsan qaybta 20aad ee Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka ee 2018.
2. Tilmaantan/amarkan waxaa uu dhaqangelayaa 22ka Janaayo 2018.
3. Soo rogidda iyo qaadista ujuurooyinka suuqa waa in loo sameeyaa si waafaqsan qaybta 17aad ee Xeerka Dakhliga Dowlad-goboleedka.
4. Qaadista ujuurooyinka suuqa waxaa ay ka dhici kartaa suuqyada dadweynaha ee ay diyaarisey Dowladda Hoose ee Degmada.
5. Qaadista ujuurada waa in lala kaashadaa saraakiisha degmada ama dowladda hoose. Saraakiil degmada u shaqeeya waa in loo magacaabaa in ay si toos ah ujuurooyinka uga qaadaan kuwa deggan goobaha ganacsiyada yaryar, oo ay u gooyaan tigidho daabacan oo risiidh ah, ayna lacagta maalin kasta la ururiyo u geeyaan Wakiilka Dakhli-ururinta Suuqa ee La Aqoonsan Yahay, kaas oo siin doona hal risiidh, oo lacagtana ku shubaya Xisaabta Mideysan ee Khasnadda isaga oo sii marinaya Nidaamka Maareynta Maaliyadda iyo Nidaamka Maareynta Dakhliga.
6. Ka-hor inta aan la bilaaban lacag-qaadista, ama 30 maalmood gudahood marka uu bilowdo sharcigan, degmooyinku waa in magacaabaan sarkaal sare oo loo diiwaangeliyo Wakiil Dakhli Ururin Suuq oo La Aqoonsan Yahay.
7. Degmooyinka waa in macluumaadkan soo socda ay siiyaan Agaasimaha Dakhli-Ururinta:
    a. Dokumentiyada la xiriira dhammaan suuqyada dadweynaha ee ku yaalla dhulka hoos yimaada Degmada.
    b. Liiska iyo tilmaamaha dhammaan suuqyada uu maamulka degmada u qoondeeyey in ay noqdaan suuqyo dadweyne oo ay la socdaan khariidad muujineysa degaanka uu yaallo suuqa iyo sawirrada albaabka laga galo suuqa.
    c. Qorshaha suuq kasta oo muujineya halka ay ku yaallaan iyo tirada goobaha ganacsi ee cayiman.
    d. Halkii laga helayana, sawir la qaadey iyada oo dusha kore (hawada) laga soo eegayo suuqa.
    e. Qiyaasta xaddiga lacagta sanadka laga filayo in laga qaado suuq kasta.

8. Wakiilka Dakhli-Ururinta Suuqa ee La Aqoonsan Yahay waa in uu:
    a. Dakhliga ka ururiyaa Saraakiisha Degmada ee la magacaabey uuna siiyaa risiidh.
    b. Kormeer muddo ka dibba ku sameeyo si loo hubiyo in saraakiisha degmadu ay ujuurooyinka u qaadeen si sax ah.
    c. Dakhliga laga ururiyey suuq kasta u xawilo xisaabta mideysan ee khasnadda ee Wasaaradda Maaliyadda isaga oo adeegsanaya nidaamyada loogu talogaley.
    d. Cashuur-bixiyeyaasha gaarsiiyo qaan-sheegashooyinka, bayaamada iyo dalabaadka ay gudbineyso Wasaaradda Maaliyadda.
    e. Warbix-bileedyada ama warbixinnada maaliyadeed iyo hawlgal ee kale ee muddo ka dibba la sameeyo uu hadba sidii loogu baahdo u siiiyo Agaasimaha Dakhli-Ururinta, iyaga oo lagu diyaariyey foomamka loogu talogaley.

Cabdirahman Ibraahim Aadan (Satte)
Wasiirka Maaliyaadda
Koonfur Galbeed Soomaaliya